SOMALISKA

BAYAANKA DOORASHADA 2023-2026

SANDVIKEN SIDAN WAA AY KA SII FIICNAAN KARTAA!

Waxyaabo aad u wanagsan ayaa ka dhacay degmada Sandviken sanadihii ugu dambeeyay. Gaar ahaan hay'adaha caafimaadku si wanaagsan ayay aafadi u maareeyeen, iyadoo uu heerka dhimashadu waqtigaa ahaa 2.3%.

Sannadkan waxa kale oo billaabatay dhisidda hool cusub oo jimicsi iyo hool dhaqdhaqaaq oo wax walba leh Storvik.

Waxaan rabnaa inaan sii wadno horumarinta degmada oo dhan, iyadoo dhaqanka, isboortiga, dugsiga iyo shaqada diiradda la saarayo.

Si wadajir ah ayaan u abuurnaa mustaqbal la rumeysan karo iyo amniga uu qof kastaba degmada ku helo!

Sooshaal dimuqraadiga Sandviken

Sandviken – degmada warshadaha iyo dhaqanka ee casriga ah

Haddaanu nahay Sooshaal dimuqraadiga Sandviken waxaan bogagga soo socda ku soo bandhigaynaa barnaamijkeenna doorashada ee mudda xileedka 2023-2026.

Sandviken waa degmo warshadeed iyo dhaqan oo casri ah. Waxa halkan lagu tilmaamayo dabcan maaha dhammaan waxa aan ku shaqayn doonno, laakiin waxa ay sawir ka bixinayaan sida aan u aragno xaaladda iminka iyo guud ahaan baahiyaha mustaqbalka.

Bulsho sooshaal dimuqraadi ah dabcan waa lagu dhisi karaa maxali ahaan, laakiin siyaasad Sooshaal dimuqraadi oo xoog leh waxay sidoo kale u baahantahay dawlad sooshaal dimuqraadi oo heer qaran iyo heer gobolba labadaba ah. Waxaan taas ugu yaraan aragnay intii ay aafadu socotay, halkaasoo isku-dubbarid iyo abaabul heerar kala duwan ah oo ku wajahan hadaf guud ay aad muhiim u ahayd.

Annagu haddaanu nahay Sooshaal dimuqraadiga iskama horkeeneyno dadka buka iyo kuwa caafimaadka qaba, waayeelka iyo da'yarta, ragga iyo haweenka, magaalooyin-ka iyo miyiga ama kan shaqeeya iyo shaqadiisi waayey.

Sandviken-teennu waa bulsho furfuran oo dhaqamo badan, dimuqraadi ah, simman oo kala sarreyn lahayn.

Sooshaal dimuqraadiga Sandviken wuxuu ka shaqayn doona in

- Sandviken ay ahaato degmo ay aamintahay in lagu dhex noolaado
- Qof kasta ay fursad u hesho shaqo
- Dugsigu uu qof walba siiyo waxbarasho wanaagsan, gacan ka gaysto tarbiyada bulshanimo, kana jawaabo baahiyaha gaarka ah ee ardayda
- Aan helno daryeel guud oo xooggan oo aan faa'iido laga dhex raadineyn
- Qof kasta ay madaddaalo fursado wanaagsan u hesho, kana qayb qaadan karto wixii jira ee ah ciyaaro iyo hidda-iyo-dhaqanno ah.
- La ilaaliyo, lana hormariyo dhismeheenna gaarka ah ee dhaxalka hiddaha iyo dhaqanka

Codkaagu waa mid wax kala saaraya. Waan kugu xisaabtamaynaa maalinta doorashada ee 11ka Sebtembar!

Degmo kobcaysa

- Degmada oo dhan waxaa mustaqbalka loo dhisi doonaa si ka sii xoog badan
- Ugu yaraan 500 oo guri oo cusub
- Meelo waara oo lagu noolaado, laguna kumo

Shaqo iyo kobac loogu tala galay mustaqbal la aami karo

- 1000 shaqo oo cusub oo degmada ah
- Ugu yaraan 400 oo goob oo baraagtiig ah oo laga dhex helayo qeybaha degmada sannadkiiba
- Ay shirkadaha u fududdahay in ay saldhigtaan, kuna horuumariyaan ganacsiyo
- Degmadu waxay marka loo tartamayo wax dhisidda shardi ka dhigi doontaa tababarro waxbarasho
- Iyada oo wadashaqeyn ballaaran la yeelanayo, waxaan dhiirri gelineynaa kobcinta aqoonta iyo in wax la barto nolosha oo dhan

Aqoontu waxay Sandviken ka dhigaysaa mid xoog badan

- Dhammaan dugsiyada ay ardaydu maanta dhigtaan waa ay sii jiri doonaan
- Xuquuqda ay carruurtu u leeyihiin hawlaha waxbarashada ee dugsiga xannaannada waa la sii kordhin doonaa
- Dugsigu waa inuu ka jawaabaa dhammaan baahiyaha canug walba u goonida ah si ay dhammaan u helaan duruufaha ugu wanaagsan ee ay ku qaadan karaan shahaaddada dugsiga sare
- Khayraadka dhijitaalka ah waa qayb dabiici ah oo ka mid ah waxbarashada.
- Dugsiga hoose-dhexe waa inuu bixiyaa quraac

Daryeel iyo xannaano wanaagsan oo degmada oo dhan ah

- Waxaan ilaalin doonnaa xakamaynta dimuqraadiga ah ee daryeelka bulshada
- Ugu yaraan 100 goob oo shaqo oo cusub oo xagga daryeelka la xiriira
- Madax-bannaanida oo korodhay iyo xorriyad weyn oo loogu talagalay dadka qaata daryeelka
- Farsamo cusub oo faa'iido badan u leh la daryeelayaasha iyo shaqaalaha

Ammaanka aduunka isbedbeddelaya

- Degmada oo dhami waa inay noqotaa meel ammaan ah, soo jiidasho leh in lagu noolaado, lagana shaqeeyo
- Waxaan kulmi doonnaa iyadoo aysan jirin xadyo dabaqado bulsho si aan u xoojinno qiyamka dimoqraadiyadda
- Waxaan ka hortaggi doonnaa kala soocidda, waxaanna kor u qaadi doonnaa meelaha bulsho iyo dhaqaale ahaan nugul

Dhaqan, dabiicad iyo ciyaaro

- Fritidsbanken ayaa laga hirgelin doonaa meelo badan oo degmada ka mid ah
- Waxaa la abuuri doonaa kayd dabiico oo ay degmadu leedahay
- Waxaa la taageeri doonaa horumarka dalxiiska iyo ku damaashaadidda dabiicida
- Laamaha maktabadda waa la horumarin doonaa

U codee Sooshal dimuqraadiga!

Waxaad horay u sii codayn kartaa laga billaabo 24ka Agoosto ilaa iyo 11ka Sebtembar

Soo qaado aqoonsigaaga iyo kaarka cod-bixinta ee kuugu yimid boostada guriga.

Bogga intarneetka: sapsandviken.se

Facebook: facebook.com/s.sandviken

Instagram: instagram.com/s.sandviken

Twitter: twitter.com/ssandviken